

Somali

# ADEEGYADA ISDHEXGALKA VANTAA EE LOOGU TALAGALAY DADKA KU HADLA LUQADAHA AJNABIGA EE KA BAXSAN XOOGA SHAQADA

**Adeeggeena adiga ayaa lagugu talagalay haddii aadan shaqayn karin ama aadan wakhti xaadirkan shaqo raadinayn.**
Tusaalayaasha sababta aad uga baxsanaan karto xooga shaqada:

- waxaad guriga ku daryeeshaa ilmo
- waxaad tahay hawlgab ama daryeele qof kale qoyskaaga ah
- waxaad qabtaa naafonimo ama xanuun
- waxaad Finland ku joogtaa magangalyada caalamiga ah

**Waxaad heli kartaa hagitaan shaqsiyeed oo ku saabsan arrimaha soo socda, tusaale ahaan:**

- Koorsadaha luqadda Finnishka ama Iswidishka
- waxbarashada
- Adeegyada hiwaadaha iyo madadaalada
- adeegyada iyo hawlaha ka jiro aaggaaga
- adeegyada taageerida shaqo helitaanka

**Adeegyadu waa kuwo lacag la'aan ah.**
Waxaan adeegyada ku bixinaa afafka Finnishka, Iswidishka, Ingiriiska ama luqadaada hooyo. Haddii loo baahdo, waxaan isticmaali doonaa turjumaan.

**Waxaan kaa gacan siin doonaa inaad nolol wanaagsan ka dhisato Finland iyo Vantaa. Ha ka labalabaynin inaad nala soo xiriirto!**

Vantaa



# ADEEGYADEENA ADIGA AYAA LAGUGU TALAGALAY. SOO DHAWOOW!

**Hagitaanka iyo la-talinta**

**Koorsadaha hanuuninta bulshada: macluumaad ku saabsan Finland**

**Qiimaynta baahiyaha adeegga ee ku saabsan kartida iyo isdhexgalka**

**Qorshaha isdhexgalka**

**Isdiiwaangeli waxaana kuu samayn doonaa ballan!**

Shirka ayaa ku lug lahaan doonaa ka doodista arrimaha soo socda:

- maxaa kaa caawin kara isdhexgalkaaga
- xaaladaa ku sugan tahay iyo tan qoyskaaga
- waxbarashadaada iyo aqoontaada luqadda
- halka aad ka heli karto adeegyada kuugu fiican
- waayo-aragnimadaada shaqo iyo hadafyada aad ka leedahay nolosha shaqada

Isku diiwaangeli adeegyada adigoo buuxinaya foomka lagu furi karo koodhka QR-ka ee ku qoran buug-yaraha. Waxaad sidoo kale isku diiwaangelin kartaa khadka taleefanka ama iimaylka.


**Xogta Xiriirka**

- Barta adeegga ee Vantaa ee shaqada iyo macaamiisha caalamiga ah: Vernissakatu 1, 01300 Vantaa
- kotoutuminen@vantaa.fi
- +358 9 839 50920 (Isniinta–Jimcaha 10:00–14:00)


bit.ly/pta-vantaa